# Qoraal tilmaan ah oo loogu talogalay kalkaaliyayaasha arrimaha daryeelka

## 1. Guud ahaan

Qaadida mas'uuliyadda daryeelka, waxaad gudaneysaa waajibaad muwaadin oo muhiim ah. Waxa aad qaadaysaa xil sharafeed ay tahay in aad si damiir leh oo xilkasnimo ku jirto aad u gudato si gaar ah oo dani ugu jirto qofka la daryeelayo ee laguu igmaday.

Qoraalada xeerarka ku saabsan daryeelka waxay ku xusan yihiin qodobbada §§ 1882 – 1888 ee buugga sharciga muwaadiniinta BGB.

Sida ku cad qodobbka § 1888 ee buugga sharciga muwaadiniinta BGB waxaa jira qoraalo sharciyeed badan oo ku saabsan daryeelka (qodobbada §§ 1821; 1823 – 1824; 1826; 1835 – 1862; 1864 – 1867; 1870 – 1874; 1875 Abs. 1; 1876 Abs. 1; 1877 – 1881 ee buugga sharciga muwaadiniinta BGB) kuwaa oo loo isticmaalo. Waxaa lagugula talinayaa inaad barato sharciyadan.

Maxkamadda daryeelka ayaa kormeerta howshaada waxayna talobixin kaa siinaysaa dhammaan su'aalaha la xiriira howlaha ay hay´deedu u qaabilsan tahay.

Waa inaad maxkamada daryeelka wakhti kasto haddii ay ku weydiiso macluumaadka ku saabsan hogaaminta xafiiska howlgalkaaga.

Adiga ayaa mas'uul ka ah qofka la daryeelayo waxyeelada gaadha oo ka dhasha jebinta waajibka; gaar ahaan haddii aad si waajib-darro ah ugu guul darreysato in aad qofka la daryeelayo uu u helo waxuu xaq u leeyahay. Waad iska caymin kartaa linusrance baad gali kartaa) khatartan. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa maxkamadda daryeelka.

Lacagta qofka la daryeelayo waa in la maalgeliyo, haddii aanan looga baahnayn bixinta kharashyada hadda socda. Maalgalinta ugu weyn waa in lagu maalgeliyo akoon bangiyeed oo lacagta lagu si kayd ah loogu haynayo, kaas ah heshiis-akoon oo aan lacagta laga soo saarayn. Maxkamadda daryeelka waxay kuu oggolaan kartaa inaad hab kale maalgalinta u samayso haddii aad codsato sida waafaqsan qodobbka § 1848 ee buugga sharciga muwaadiniinta BGB.

## 2. Xaalada daryeelka marka la maqan yahay kaliya

Inta lagu jiro xadka ay dejisay maxkamada daryeelka, adiga ayaa mas'uul ka ah arrimaha maaliyadeed ee maqanaha waxaadna xaq u leedahay inaad wakiil ka noqoto maqanaha ilaa inta mas'uuliyaddaada ay u xilsaaran tahay.

## 3. Joojinta daryeelka

Howshaadu waxay dhammanaysaa

a) haddii ay maxkammada daryeelka joojiso howsha daryeelka,

b) haddii ay noqoto daryeelka in ay arrimaha gaarka ah u qabato xalintooda..,

c) haddii ay noqoto mas'uuliyadda qofka maqan, oo leh awoodda sharci ee go'aanka ku dhawaaqista dhimashada ama go'aaminta wakhtiga dhimashada..